AQIS Fact Sheet

Ogaanshaha Karantiinka ee dadka soo dejiya Qaadka

Barnaamijka Boosta Caalamiga ah ee AQIS – warqada xaqiiqda

Warqadan xaqiiqda waxay faahfaahineysaa macluumaad karantiin oo muhiim ah oo khuseeya soo dejinta qaadka.

Soodejinta qaadka waxaa xaddidaya shuruucda kastanka (*waxyaalaha soodejintoodu reeban tahay*) si aad u soo dejiso qaad wa inaad haysataa liisan aad ku soo dejiso iyo ogolaansho aad ku soo dejiso oo ay bixisay maamulka badeecada daawo ahaanta loo isticmaalo (www.tga.gov.au).

Waa inaad ogtahay in sidoo kale ay jiraan xanibaadyo lagu soo rogey kazoo dejinta qaadka Adeega Baaritaanka iyo Karantiinka Australia (AQIS) waxaa jira dhawr tallaabo oo aad ubaahan tahay inaad qaado si aad u hubiso inaad raacday nidaamkii saxda ahaa ee aad uga soo dejin lahayd badeecadaan.

Shuruudaha Baaritaanka Soodejinta ee Hore ee AQIS:

- Waxaad u baahan tahay inaad hesho Ogolaanshaha Soodejinta ee AQIS ka hor intaan xammuulkaagu iman Australia ama ka hor dhicitaanka **Ogolaanshahaaga soodejinta ee AQIS**. **Ogolaanshaha Soodejinta ee AQIS** waxaa laga heli karaa website ka AQIS ee ah (www.aqis.gov.au) ama ado wacaya (02) 6272 4578.
- Qofka loo soodejinayo iyo cinwaanka soodiraaga ee ku qoran qaadka loodirey waa inay is lahaadaancinwaanka ku qoran **Ogolaanshahaaga Soodejinta ee AQIS**
- Waxaa la ogol yahay oo keliya in caleenta qaadka la soo dejiyo.
- Xammuulka qaadka waa inuusan lahayn wax dhib ah oo uusan cayayaan ku dhalan. Dhibka waxaa yeelan kara cunto kasta, xoolaha ama waxyaalaha dhirta laga sameeyey ee aan qaadka ahayn ee la socda xammuulka.

Dhammaan xammuulada waa inay fasaxdaa AQIS waana la baarayaa. Haddii ay dhib leedahay xammuulkaaga qaadku wuxuu u baahanayaa inay daaweeyaan AQIS ka hor intaadan qaadan.

Nidaamka Baaritaanka ee AQIS

A. Maxaa dhacaya haddii xammuulkaaga ay baarto AQIS oo la helo inaysan wax dhib ah lahayn cayayaana uusan ku dhalan?

- Waxaad ka helaysaa boosta dukumiintiga AQIS ee la xiriira arintan, oo ay ku jiraan **Ogeysiin in lala wareegayo Alaabta** iyo **Ogeysiinta Bixinta lacagta Ogolaanshaha** iyo **waraaqo macluumaad oo ku saabsan Ogolaanshaha AQIS**.
- Waa inaad siisaa AQIS iyadoo leh **Ogolaansho Soodejineed** iyo nuqulka **in la doonayo la wareegitaanka alaabta**.
- Marka dhammaan shuruudaha ogolaanshaha wax soo dejinta ee AQIS la fuliyo, waxaa kuu fasaxaya xammuulkaaga AQIS.
- Xammuulkaaga waxaa baarayaa Kastanka.
- Xammuulkaaga ka dib waxaa siideynaya kastanka haddii ay fuliso shuruudaha soodejinta ee Kastanka waa laguu sii deynayaa Qaadka. Dhibka waxaa yeelan kara cunto kasta, xoolaha ama waxyaalaha dhirta laga sameeyey ee aan qaadka ahayn ee la socda xammuulka.

B. maxaa dhacaya haddii ay baarto AQIS Xammuulkaaga oo ay aragto dhib caafimaad leedahay ama cayayaan?

- Haddii lagu arko cayayaan ku dhashay ama dhibaato caafimaad xammuulkaaga, waxaa laguu soo dirayaa warqad **Amar ah in la Karantiino Badeecadaada** taas oo ku tiisanaysa fursado lagu daaweynayo xammuulkaaga iyo **Ogeysiinta Lacag bixinta Soodiritaanka**.

Waxaad u baahan tahay inaad ogaato in daaweynta qaadku ay waxyeeli karto badeecadaada.

- Haddii aad dooneyso in daaweynta la sii wado waa inaad buuxisaa foomka lacag bixinta oo aad u soo dirtaa lacagta saxda ah AQIS. Badeecada waxaa loo dirayaa in la soo daaweeyo **oo keliya** ka dib marka lacagta la helo.
- Habka daaweynta waxaa laga yaabaa inuu qaato ilaa 4 toddobaad dhameystiridiisu.
- Qaadka waxaa lagu soo celinayaa marka la daaweeyo ka dib xarunta alaabta la soo dhoofiyo.
- Ilaa halkan, waa inaad raacdaa nidaamka ku faahfaahsan Qaybta A ee Habka Baaritaanka ee AQIS.

Faa'iidada soodejinta xammuul Qaad oo nadiif ah

Waxaa jira dhawr faa'iido oo lagu hubin karo inaad ka soo dejineyso Australiya xammuul Qaad Nadiif ah oo ay ku jiraan:

- Uma baahan doontid inaad ka bixiso lacag dheeraad ah daaweynta xammuulka Qaadka.
- Wakhtiga laguu fasaxayo ayaa ka gaaban badeecadaadana waxaad ku heli kartaa si ka dhakhso badan.
- Ma laha khatar ah in alaabadaada dhaawac soo gaaro marka la marinayo daaweyn loo baahan yahay in la marsiiyo.

Haddii aad qabto wax weydiimo dheeraad ah ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah wax ka mid ah arimaha lagu faahfaahiyey warqadan waxaad la xiriiri kartaa:

Faahfaahinta Xiriirka AQIS

Melbourne Gateway Facility
2-6 Sperry Drive,
Tullamarine, VIC 3043
Ph: (03) 9310 3155

Sydney Gateway Facility
21 Factory St
Clyde, NSW 2142
Ph: (02) 9897 2108

Qantas Mail Handling Unit
Link Rd
Mascot, NSW 2018
Ph: (02) 8338 0081

Brisbane Airports Logistic Centre
25-27 Qantas Drive
Brisbane Airport, QLD 4007
Ph: (07) 3246 8678

International Post Perth
Affleck Rd
Newburn, WA 6105
Ph: (08) 9277 6889

Adelaide Parcel Centre
272 Gouger St
Adelaide, SA 5000
Ph: (08) 8945 3014

Winnellie Mail Centre
354 Stuart Hwy
Winnellie, NT 0820
Ph: (08) 8945 3014

Lacagta Daaweynta (Treatment Payments)
Collector of Public Monies
Australian Quarantine and Inspection Service
Locked Bag 34
KINGSTON ACT 2604

AQIS waxay ku jirtaa Interneetka (AQIS on the Internet)
Macluumaadka AQIS - www.aqis.gov.au
Keydka Shuruudaha Waxsoodejinta ee AQIS (AQIS Import Conditions Database - www.aqis.gov.au/icon

Weydiimaha Iimeylka (E-mail Inquiries)
international.mail@aqis.gov.au